Helsinki

# Baro dugsiga

## Macluumaad ku saabsan dugsiga hoose-dhexe ee reer Helsinki oo loogu talagalay qoysaska dalka u soo guuray.



# Ku soo dhowow dugsiga reer Helsinki!

Waxaad gacantaada ku heysaa hagaha Baro dugsiga, kaas oo ka hadlaya arrimaha muhiimka ah ee dugsiga hoose-dhexe ee Finnishka. Hagahan wuxuu adiga iyo cunuggaada idinka taageerayaa billaabista dhigashada dugsiga. Hagahan waxaad ka heleysaa macluumaadka waxqabad ee ku saabsan billaababashada dugsiga iyo nololmaalmeedka.



## Helsinki waxaa xoogga lagu saaraa waxbarashada

Cunuggaagu wuxuu dugsiga ku baranayaa macluumaad iyo aqoon ka caawinaya in uu bulshada ka helo booskiisa. Cunuggaagu wuxuu baranayaa sidi uu u heli lahaa awooddiisa iyo waxyaabaha uu xiiseeynayo iyo in uu dadka kale wax la qabto. Cunuggaaga dugsiga muhiimad ayaa lagu siinayaa waana la dhegeysanayaa.

Waxaan doonaynaa in aan wadashaqeyn dhow la yeelano guriga inta lagu jiro marxaladaha kala duwan ee wadada waxbarashada. Ka sokow macallimiinta waxaa dugsiga ka shaqeeya xirfadlayaal badan, kuwaas oo ardayda caawiyaha islamarkaasna taageera. Waxaa sidoo kale dugsiyada Helsinki ka shaqeeya hagayaal luqado badan ku hadla, kuwaas oo adiga iyo qoyskaadaba ka caawinaya arrimaha la xirira dhigashada dugsiga.

Hadafkeenu waa, in carruurta reer Helsinki oo dhan ay helaan waxbarasho wanaagsan iyo in cunug kasta si shakhsi ah loogu xisaabtamo iyadoo aan wadajirkana la illaaweyn.

## Dugsigu waa shay muhiim u ah nolosha cunugga iyo da'yarka iyo weliba qoyska

Waxaan rajaynayaa, in hagahan ay qoyskiinu ka helaan macluumaadyo faa'iido leh oo ku saabsan waxqabadka dugsiga iyo jawaababha su'aalihiina. Macallimiinta dugsiga iyo shaqaalaha ayaa iyagoo ku faraxsan bixinaya macluumaad dheeraad ah.

**Outi Salo**
Maamulaha waxbarashada aasaasiga ah
Waaxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada
Magaalada Helsinki

# Tusmada – waxyaabaha hagahan ku jira

## Ku soo dhowow dugsiga reer Helsinki


Qof kasta waxaa loo helayaa qaab ku habboon oo uu dugsiga ku dhigto 6
Marka uu cunuggu dugsiga billaabo ........ 8
Wadashaqeynta guriga iyo dugsigu waxay taageertaa ardayga ........ 11
Hagaha luqada badan ku hadla wuxuu taageeraa qoyska ........ 13


## Waxbarashada diyaarinta ah iyo horumarinta aqoonta luqada


Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada aasaasiga ah ........ 14
Aqoonta luqadeed ee dhinacyada badan waa muhiim ........ 16
Waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah ........ 18


## Waxbarashada iyo qiimeynta


Waxbarashadu waxay ku saleysantahay qorshaha waxbarashada ........ 20
Qiimeynta barashada iyo aqoonta ee ardayga ........ 22


## Nabad ku aad wadada waxbarashada


Jadwalka xiisadaha ayaa haga maalinta dugsiga ........ 24
Khulood wuxuu ku jira fasalka 4aad ee dugsiga hoose-dhexe ........ 25
Waxqabadka subaxdi iyo galabti ee dugsileyda ........ 26




## Horay ugu soco wadada waxbarashada

Waxbarashada fasallada 7aad—9aad ........ 28
Mohammad iyo Ibrahim waxay ku jiraan fasalka 9aad ee dugsiga hoose-dhexe ........ 30
Hagaha waxabarashadu wuxuu ka caawinayaa qorsheynta sii wadashada waxbarashada ........ 32

## Maadooyinka aragtida ee dugsiga hoose-dhexe

Diin mise cilmiga aragtida macnaha nolosha ........ 34

## Taageerada waxbarashada iyo dhigashada dugsiga

Daryeelka ardaydu waa taageerada nololwanaagga iyo caafimaadka ardayda ........ 36
Taageerada waxbarashada iyo dhigashada dugsiga ........ 39

## Dugsiga hoose-dhexe kaddib

Waddooyinka waxbarashada ee Helsinki ........ 40
Waxyaabaha la kala dooran karo dugsiga hoose-dhexe kaddib ........ 42

Macluumaadyo dheeraad ah iyo linkiyo ........ 46



# Qof kasta waxaa loo helayaa qaab ku habboon oo uu dugsiga ku dhigto

Dugsiga hoose-dhexe wuxuu quseeyaa nolosha dhammaan carruurta iyo dhallinyarada deggan Finland. Waajibka waxbarashada waxaa loola jeedaa, in cunuggu uu dugsiga hoose-dhexe dhammeeyo. Xilka waalidka saaran waa ku dadaalista, in cunuggu uu waajibkan ka soo baxo. Cunugga iyo da'yarkaba waa in si degdeg ah looga diiwaangeliyaa dugsiga imaanshaha dalka kaddib.

Waajibka waxbarasho ee cunuggu wuxuu billaabanayaa sannadka uu buuxiyo 7 sano. Waajibka waxbarashadu wuxuu dhammaanayaa, marka caddadka waxbarasho ee waxbarashada aasaasiga ah la dhammeeyo, ama marka ay billaabashada waajibka waxbarashada ay ka soo wareegto 10 sano. Da'da waajibka waxbarashadu wuxuu quseeyaa dadka 7 –17 sano jirka ah. Qofka dalka u soo guuray iyo kan megangelyo-doonka ah ee jira da'da waajibka waxbarashadu wuxuu xaq u leeyahay waxbarashada aasaasiga ah. Ardayga waxaa la geynayaa fasal uu heerkiisu u dhigmo da'diisa.


Marka uu cunuggu dhammeeyo dugsiga hoos-dhexe, wuxuu helayaa shahaadada qalinjebinta. Shahaadadaas wuxuu cunuggu boos waxbarasho uga codsan karaa dugsiga sare ama waxbarashada xirfadda.

### Booska dugsiga xaafadda

Magaalada Helsinki waxay cunugga ka siisaa booska dugsiga ka siisaa dugsiga ku yaal xaafadda qoyska. Waxaa kale oo Helsinki ku yaal dugsiyo gaar loo leeyahay iyo kuwa ay dowladdu leedahay.

### Waxbarashada diyaarinta ah ee dugsiga hoose-dhexe

Ardaygu wuxuu ka qaybqaadanayaa waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada aasaasiga ah, haddii aysan aqoontiisa afka finnishka ama iswiidhishku aysan ku filnayn in uu wax ku barto kooxda waxbarashada guud. Waxbarashada diyaarinta ah waxay qaadataa 12 bilood, markaas kaddib ardaygu wuxuu u wareegayaa waxbarashada aasaasiga ah.



## Taageero ayaa waxbarashada loo helayaa

Cunug kasta wuxuu wax ku baranayaa habkiisa iyo xawligiisa. Dugsigu wuu ku xisaabtamayaa baahiyaha gaarka ah islamarkaasna kala duwan ee uu cunuggu qabo. Qof kasta waxaa loo helayaa qaab ku habboon oo uu dugsiga ku dhigto. Waxbarashada waxaa lagu dugsiga looga taageeri karaa habab kala duwan. Taageeradu waxay noqon kartaa taageero guud, mid la xoojiyay ama taageero gaar ah.

## Waxbarashada ku baxda luqada finnishka ama iswiidhishka

Magaalda Helsinki waxay waxbarashada aasaasiga ah ku bixisaa luqada finnishka ama iswiidhishka. Iswiidhishku waa luqada labaad ee rasmiga ah ee Finland.

## Waxbarashada xoogga la saaray iyo tan laba luqadeedka ah

Dugsiyada magaalada Helsinki waxay bixiyaan waxbarasho xoogga la saaray ama mid laba luqadeed ah. Waxbarashada xoogga la saaray waxay loola jeeda, in dugsiga lagu baran karo maadooyinka qaar, tusaale ahaan muusikada oo ka yara badan kuwa caadiga ah. Waxbarashada xoogga la saaray waxaa lagu codsadaa, in la iska diiwaangeliyo imitixaanka ku habboonaanta. Imitixaanaadka ku habboonaanta waxaa la qabanqaabiyaa Janaayo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada xoogga la saaray waxaa laga helaa maamulayaasha dugsiyada iyo bogagga shabakadaha:
https://www.hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/mita-opiskellaan/painotettu

Marka lagu jiro waxbarashada laba luqadeedka ah waxaa dhammaan maadooyinka dugsiga lagu qaadanayaa laba luqad, af finnishka iyo luqada kale ee wax lagu baranayo. Hadafka laga leeyahay waa, in ardaygu uu barto labada luqadeed ee wax lagu baranayo. Waxyaabaha waxbarashadu ka kooban tahay iyo hadafyaduba waxay qaybaha kala mid yihiin waxbarashada halka luqad ku baxda. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbarashada laba luqadeedka ah waxaa laga helaa maamulayaasha dugsiyada iyo bogagga shabakadaha:
https://www.hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/mita-opiskellaan/kaksikielinen+opetus

## Sidan ayaa cunugga looga diiwaangeliyaa fasalka koowaad ee dugsiga

Waaxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada ayaa boostada ku soo direysa warqad guriga ku socota Warqadda waxaa ku jira wargelinta waajibka waxbarashada. Foomka waxaa ku qoran tilmaamo sax ah oo sheegaya, sida cunugga dugsiga looga diiwaangelinayo. Caawimaadda wargelinta dugsiga ee carruurta da’ kasta jirta waxaa la weydiisan karaa goobaha talobixinta iyo adeegga ee magaalada Helsinki, sooshalladda ama shaqaalaha dugsiga.

# Marka uu cunuggu dugsiga billaabo

Mas'uuliyiinta cunuggu waxay fursad u helayaan in ay billaabashada dugsiga kahor la kulmaan macallimadda. Waa suurtagal in wadahadalka billaabidda ay joogaan shaqaalaha kale ee dugsiga. Ujeedada wadahadalku waa in dugsiga la barto iyo in la maqlo arrimaha waxqabadka ee kala duduwan. Waxaa kale oo uu dugsigu qabanqaabiyaa fiidadka kulanka waalidiinta billaabashada dugsiga kahor. Xilka mas'uulka cunuggu waa ku taageeridda cunugga dhigashada dugsiga iyo in uu ka qaybqaato munaasabadaha dugsigu qabanqaabiyo. Ka qaybqaadashada fiidadka kulanka waxay mas'uuliyiinta carruurtu ka helayaan macluumaad ku saabsan nololmaalmeedka dugsiga shaqaalahana waa baranayaan.

**Cunto ka cunista dugsiga iyo cuntooyinka fudud**

Cunto cunista joogtada ah waxay gacan ka geysataa awoodidda iyo xoog saaridda shaqada dugsiga iyo barashada arrimaha cusub. Ardayda waxaa la siinayaa maalin dugsiyeed kasta cunto diirran oo lacag la'aan ah. Xilka mas'uulka cunuggu waa ku dadaalista, in cunuggu guriga ku soo cunay quraac kahor inta uusan dugsiga imaan.

**Kaarka gaadiidka dadweynaha iyo gaadiidka gaarka ah**

Haddii safarka dugsiga ee cunugga dhigta fasal-sannadeedyada 1-6 uu ka badan yahay labo kilomitir kan dhigta fasal-sannadeeydada 7-9 uu ka badan yahay 3 kilomitir, mas'uulka cunuggu wuxuu u codsan karaa kaarka gaadiidka dadweynaha oo uu dugsiga ku aadayo. Kaarka safarka gaadiidka dadweynaha wuxuu ardayga deggan Helsinki u heli kara oo kaliya dugsiga u dhow ama kooxda waxbarashada xoogga la saaray. Gaadiidka gaarka ah waxaa la codsan karaa, haddii uusan cunuggu awoodin in uu iskiis uga soo baxo safarka dugsiga naafo, jirro ama dhibaato kale oo gaar ah darteed.

**Caymisyada**

Magaalada Helsinki ayaa ardayda oo dhan gelisay caymiska shilalka. Caymisyadu ma quseeyaan hantida gaarka ah ee ardaydu leeyihiin.


**Wakhtiyada shaqada iyo fasaxyada dugsiyada ee Helsinki**

Sannad-dugsiyeedka waxaa ku jria labo xilli-dugsiyeed, xilli-dugsiyeedka dayrta iyo xilli-dugsiyeedka gu'ga. Xilli-gugsiyeedka - dayrtu wuxuu billowdaa billowga

Agoosto wuxuuna dhammaadaa fasaxa kirismaska. Xilli-dugsiyeedka gu'gu wuxuu billowdaa Janaayo wuxuuna dhammaadaa Sabtida todobaadka 22aad, yacni dhammaadka Maajo-Juun. Xilliga fasaxa ee ugu dheer wuxuu ku jiraa xagaaga. Fasaxa xagaagu wuxuu qaataa wax inyar ka badan labo bilood. Fasaxyada kale waa fasaxa dayrta ee bisha Oktoobar oo qiysaastii todobaad ah, fasaxa kirismaska ee dhammaadka sannadka oo ah qiyaastii labo todobaad iyo fasaxa qaboobaha ee Febraayo oo todobaad ah (todobaadka 8aad).

Waxaa kale oo intaas dheer in shaqada dugsiga laga fasaxan yahay maalmahan ciidaha ee soo socda:
**6.12. Maalinta xornimada**
**6.1. Dhammaadka ciidda Kirismaska**
**Maarso-Abriil, Iistar, afar maalmood oo fasaxa iistarka ah**
**waxay ka kooban yihiin dhammaadka todobaadka iyo maalmo ciid ah**
**1.5. Maalinta 1da Maajo**

Taariikhyada rasmiga ah ee shaqada dugsiga iyo fasaxyada waxaa billowga sannad-dugsiyeed kasta lagu sheegayaa bogagga shabakadda dugsiyada.




## Shaqada dugsiga iyo wakhtiyada fasaxa

Dhigashada dugsigu waa shaqada ardayga. Fasaxyada qoysku waa in sida caadiga ah la qaataa inta lagu jiro wakhtiyada fasaxa dugsiga. Wakhtiyada kale waa in markasta ka fasixidda shaqada dugsiga qoraal ahaan loo codsadaa. Ka maqnaanshaha dugsigu waxay yareynaysaa waxbarashada uu ardaygu qaadanayo. Waajibka mas'uulka cunugga saaran waa ku dadaalista, in uusan ardaygu waxbarashada ka harin mudadi uu maqanyahay.



Maalin dugsiyeed kasta waxaa ku jira biririfyo yar yacni bareeg. Ardaydu waxay markaas wakhti ku qaadanayaan ardaaga dugsiga. Ardayda fasallada sare waxay saacadaha bareegga ku qaadan karaan gudaha. Macallimiinta ayaa illaaliya saacadaha bareegga.

## Tilmaamo waxqabad billaabista dugsiga oo loogu talagay mas'uuliyiinta

- **U diyaargarow billaabashada dugsiga.** Cunuggu wuxuu dugsiga dartiis u baahan yahay boorsada dhabarka ee dugsiga, boorsada qalimaanta iyo dharka jimicsiga ee bannaanka iyo gudaha. Waxbarashada, agabka waxbarashada iyo qadada dugsiguba waa lacag la'aan. Ardaygu dugsiga ayuu kuwaas ka helayaa.
- **Baro safarka dugsiga.** Waxaa wanaagsan in cunugga la baro iyadoo lala socdo sida loogu safro dugsiga. Waa muhiim, in uu cunuggu wakhti fiican dugsiga yimaado.
- **Ku dadaal labbiska cunuggaada.** Saacadaha bareega waxaa la aadaa bannaanka, sidaas darteed cunuggu wuxuu u baahan yahay in dugsiga uu u soo qaato dharka bannaanka oo cilmilada ku habboon. Finland lagama isticmaalo labbis dugsiga.
- **Xaqiiji, in cunuggaadu uu maalinti cuno cunto noocyo badan oo caafimaad leh in uu sameeyo dhaqdhaqaaq iyo nasasho ku filan.**
- **Ku soo wargeli macallinka sida ugu dhakhsaha badan, haddii cunuggaadu uu dugsiga ka maqnaanayo.** Cunug jirran dugsiga looma soo diri karo. Haddii uu cunuggaadu u baahan yahay daaweyn, u raac xarunta caafimaadka.


---

## Taageerada qoysku waa u muhiim dugsilleyda

- Xiisee dugsi dhigashada cunuggaada. Ka qaybqaado ka shaqaynta laylista kana taageer cunugga tusaale ahaan u diyaargaroobidda imtixaanka.
- Sii cunugga wakhtigaada qaybna ka noqo nololmaalmeedkiisa.
- Xaqiiji, in cunuggaadu uu heysto dareen ammaan iyo in uu dareemo in uu helayo jaceyl Ka taageer cunuggaada horumarinta aqoontiisa bulsho.
- Kula hadal cunuggaada luqada qoyska. Ku dhiirrigeli kana caawi horumarinta in aqoontiisa luqadeed ay sameyso horumar dhinacyo badan.
- Waalid u noqo cunuggaada laakiinse xad u yeel.
- Ku dadaal, in cunuggaadu uu u isticmaalo warbaahinta si macquul ah, ammaan iyo mas'uuliyad leh.
- Dhis wadashaqeyn wanaagsan iyo kalsooni dhinacyo badan oo dugsi kaala dhexeyso.

**Aasaaska qiimaha waxbarashada iyo mabaadii'da anshaxa ee dugsiga**

- Finland waa dal aan kalasarrayn laheyn. Dugsigu wuxuu dadka oo dhan siinayaa fursad waxbarasho oo loo simanyahay. Natiijooyinka ardaydu ma aha kuwa la isbarbardhigayo. Lacagta canshuurta ayaa dugsiga lagu maalgeliyaa.
- Waalidiintu waxay qayb ka yihiin wadada waxbarashada ardayga. Mas'uulka waxaa saaran waajibka koowaad ee barbaarinta iyo waajibka waxbarashada ee cunugga.
- Ardayda waa laga qaybgelinayaa waana lagala xaajoonayaa arrimaha. Cunugga waxaa lagu dhiirigelinayaa in uu aqoontiisa isticmaalo. Shakhsinimada waa lagu xisaabtamayaa. Ardayda waxay ka qayb ka yihiin sameynta hiigsiyada, waxay la socdaan hiigsiyadaas waxayna qiimeynayaan horumarkooda.
- Horumarka cunugga waxaa loola socdaa si dhammaystiran. Xirfadlayaasha barbaarinta iyo waxbarashaduna waxay u kuurgelayaan baahiyaha gaarka ah ee uu cunugga qabi karo, si loogu gudbiyo meesha uu ka helayo taageerada ugu wanaagsan.
- Dugsiga iyo meelaha kale ee ay ka midka tahay rugta latalinta qoyska waxaa taageero looga helayaa su'aalaha la xiriira koboca iyo horumarinta cunugga iyo da'yarka, dhibaatooyinka ama xasaradaha qoyska soo wajaha.
- Ciqaabta jir ahaaneed waxaa mamnuucaya sharciga.



# Wadashaqeynta guriga iyo dugsigu waxay taageertaa ardayga

Mas'uulku wuxuu door muhiim ah ku leeyahay taageeridda dugsi dhigashada cunugga. Wadashaqeynta iyo xiriirka guriga iyo dugsiga u dhexeeya waa muhiim inta lagu jiro wakhtiga wadada dugsiga oo dhan. Mas'uulka waxaa saaran waajibka koowaad ee barbaarinta iyo waajibka waxbarashada ee cunugga. Xilka dugsigu waa in taageeridda waxbarashada iyo koritaanka cunugga isagoo bulshada dugsiga xubin ka ah.

Wadashaqeynta macallimiinta iyo mas'uuliyiinta cunugga u dhexeysa waxay cunugga ka caawisaa waxbarashada iyo koritaanka. Waxaa wanaagsan in mas'uuliyiintu ay dugsiga xiriiraan markasta oo ay su'aalo soo baxaan.

### Ablikeeshinka Wilma

Xiriirka maalinlaha ah ee dugsigu wuxuu u dhacaa qaab elegtroonik ah iyadoo la isticmaalayo ablikeeshinka Wilma. Macallimiintu waxay farriimaha ay waalidka u dirayaan oo dhan u isticmaalaan Wilmada. Maamulaha dugsigu xittaa wuxuu wargelinnada iyo munaasabadaha muhiimk ah ku soo gudbiyaa Wilmada. Waalidiintu waxay maqnaanshaha ardayga macallinka ugu soo sheegaan Wilma ama waxay kulamada ay macallinka la qaadanayaan ku qabsadaan Wilmada. Waalidku waa in uu maalin kasta la socdaa farriimaha dugsiga ka imaanaya. Wilmada waxaa lagu isticmaali karaa kambuyuutarka, tableetiga ama telefoonka. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan isticmaalidda ablikeeshinka waxaa laga helaa dugsiga.

### Kulamada waalidiinta

Macallinka iyo mas'uuliyiinta cunuggu waxay markasta isugu yimaadaan kulan ay uga hadlayaan arrimaha cunugga marka uu dugsiga billaabayo iyo sida caadiga kulanka la qabanqaabiyo ugu yaraan sannadkiba mar. Markaas waxaa la qaadaa-dhigayaa arrimaha la xiriira waxbarashada iyo dhigashada dugsiga ee ardayga.

### Fiidadka kulanka waalidiinta

Ujeedada fiidadka kulanka waalidiinta laga leeyahay waa in waalidiinta meel la isugu keeno, si ay dhexdooda isu bartaan, macallimiinta iyo shaqaalaha kalana ay u bartaan. Waalidiintu waxay helayaan macluumaad ku saabsan waxqabadka dugsiga iyo fursadaha ay uga qaybqaadan karaan waxbarashada carruurtooda iyo dhigashada dugsiga. Dugsiyada ayaa waalidiinta wakhti fiican ku soo wargelinaya fiidadka kulanka waalidiinta. Waxaa intaas dheer in deegaan ahaan loo qabanqaabiyo fiidadka kulamada waalidiinta iyo madallo luqado kala duduwan lagu sameynayo.

### Shabakadaha waalidka iyo maamulka dugsiga

Waalidku waxay isku baran karaan munaasabadaha uu dugsigu qabanqaabiyo ama munaasabadaha guddiga fasalka ee ay waalidku sameeyaan. Dugsiyada waxaa inta badan ka shaqeeya urur waalidiinta, kaas oo taageera waxqabadka dugsiga oo dhan. Dugsi kasta waxaa ka shaqeeya maamulka dugsiga, kaas oo ay ku jiraan shaqaalaha dugsiga ka sokow wakiillo ay waalidku soo xuleen iyo wakiilka ardayda.

Macluumaadka ku saabsan munaasabadaha iyo madallada uu dugsigu qabanqaabiyo waxaa laga helaa bogagga shabakadda ee dugsiga ama bogagga facebooga. Sidoo kale, waxay waalidku heystaan kooxda facebooga ee waalidiinta fasalka.



”Shaqadeyda waxaa ka mid ah talosiinta macallimiinta iyo hagayaasha waxbarashada, xiriirka wadahadallada lala yeelanayo waalidiinta iyo ardayda”, sidaas waxaa sheegtay hage **Safia Abdulkarim**.

# Hagaha luqadaha badan ku hadla wuxuu taageeraa qoyska

Hagayaasha luqadaha badan ku hadla waxay talo iyo hagitaanba siiyaan ardayda, qoysaska iyo dugsiga. Hagayaashu waxay talo ka bixiyaan su’aalaha dhigashada dugsiga la xiriira. Magaalada Helsinki waxay bixisaa hagitaan ku baxaya luqada carabiga, soomaaliga, ruushka, ingiriiska iyo finnishka.

Hagitaanka luqadaha badan ku baxa waxay taageertaa dhigashada dugsiga ee cunugga ama da’yarka iyo wadashaqeynta u dhexeysa guriga iyo dugsiga. Hagayaashu waxay kaala talin karaa isticmaalidda Wilmada, waxay si faahfaahsan kuugu sheegi karaan waxqabadka dugsiga waxayna sidoo kale ka qaybgeli karaan kulamada mas’uuliyiinta iyo shaqaalaha dugsiga u dhexeeya ee uu dugsigu qabto. Hagayaashu waxay cunugga caawimaad ka siinayaan tusaale ahaan qorshaha waxbarashada, raadinta hiwaayadaha iyo helitaanka saaxiibada.

Mid ka mid ah shaqooyinka ugu muhiimsan ee hagayaasha luqadaha badan ku hadla waa taageerida wadashaqeynta u dhexeysa dugsiga iyo guriga. Wadshaqeyntu waa ay sahlaanaataa, haddii aad ay heysto fursad aad luqadaada ku isticmaali karto ka gungaaridda arrimaha dugsiga iyo wadaagista macluumaadka. Sidan waxaa lagu xaqiijinayaa, in waalidku ay helaan islamarkaasna fahmaan warbixinta ay u baahan yihiin ee dhigashada dugsiga la xiriirta. Hagaha luqadaha badan ku hadla wuxuu sidoo kale xoojiyaa aqoonta shaqaalaha kale ee ku saabsan arrimaha luqada iyo dhaqanka.




# Waxbarashada diyaarinta ee waxbarashada aasaasiga ah

Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada aasaasiga ah waxaa loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada ay da'doodu u dhexeyso 6—17, kuwaas oo aan heysan aqoonta luqada finnishka ama iswiidhishka oo ku filan in ay wax ku bartaan. Waxbarashada diyaarinta ah waxaa loogu talagalay kuwa mardhow Finland u soo guuray. Waxaa kale oo haddii loo baahdo waxbarashadan la siin karaa kuwa Finland ku dhashay ama dalka u soo guuray iyagoo kayar da'da dugsiga. Ardaygu wuxuu xaq u leeyahay in uu sannad dhan ka qaybqaato waxbarashada diyaarinta ah.

Ujeedada laga leeyahay waxbarashada diyaarinta ah waa xoojinta aqoonta ardayga ee luqada finnishka iyo sare u qaadista aqoontiisa waxbarashada ee loogu talagalay u wareegista waxbarashada aasaasiga ah. Dugsiga luqada iswiidhishka wax looga barto waxaa lagu xoojiyaa aqoonta ardayga ee luqada iswiidhishka. Xiisadaha waxaa lagu baranayaa aragtiyada muhiimka ah ee

maadooyinka kala duduwan, hoosado iyo agab. Ardaygu wuxuu fursad u heystaa in uu u kaalmeysto waxbarashada dhammaan luqadaha uu yaqaan. Waxbarashada diyaarinta ah waxay taageertaa la qabsashada bulshada Finnishka ah.

Arday kasta waxaa loo dejinayaa barnaamish waxbarasho oo u gaar ah, kaas oo lagu qeexayo hiigsiyada shakhsi ahaaneed. Waxaa arrintan sal u ah aqoonta luqada finnishka ama iswiidhishka ee ardayga, aqoonta ardayga iyo taariikhdiisa dugsi dhigashada.

Marka ay waxbarashada diyaarinta ah dhammaato wuxuu ardaygu u wareegayaa waxbarashada aasaasiga ah ee dugsiga u dhow, halkaas oo uu ku helayo taageerada uu waxbarashada ugu baahan yahay.

### Waxbarashada diyaarinta ah ee ku jirta waxbarashada hore iyo tan billowga ah

Ardayda jirta 6 sano, waxaa waxbarashada diyaarinta ah lagu siinayaa kooxda waxbarasho-horaadka ee xannaano-maalmedka. Waxbarashada diyaarinta ah ee 7-8 sano jiryada waxaa lagu qabanqaabinayaa dugsiga u dhow iyadoo qayb ka ah waxbarashada aasaasiga ah. Ardaygu wuxuu ardayda kale ee luqada finnishka ku hadla wax kula baranayaa hal koox.  Ardayga ku jira waxbarashada diyaarinta ah wuxuu helayaa waxbarashada luqada finnishka oo joogto ah.

### Waxbarashada diyaarinta ah ee lagu qaato kooxo u gaara ah.

Ardayda jirta 9-17 sano waxaa inta badan waxbarashada diyaarinta ah loogu qabanqaabiyaa kooxo iyaga u gaara ah. Inta lagu jiro sannadka diyaarinta ah wuxuu arday kasta si joogto ah uga qaybqaadanayaa xiisadaha waxbarashada aasaasiga ah ee ay qaataan ardayda luqada finnishka ku hadla ee la da'da ah.

### Codsashada waxbarashada

Mas'uuliyiintu waa in ay cunugga ama da'yarka si degdeg ah uga diiwaangeliyaan dugsiga imaanshaha dalka kaddib. Waxbarashada diyaarinta ah waxaa la isaga diiwaangeliyaa foom loogu talagalay. 7—8 jiryada waxaa laga diiwaangelinayaa dugsiga u dhow. Kooxaha waxbarashada diyaarinta ah ee 9-16 sano jiryada lagama helo dugsiyada oo dhan. Ardayga waxaa loo jiheynayaa kooxda ugu dhow, taas oo uu boos ka bannaan yahay dhinaca isu socodka guriga iyo dugsigana ku wanaagsan.

Caawimaadda iska diiwaangelinta waxbarashada diyaarinta ah waxaa la weydiisan karaa goobaha talobixinta iyo adeegga ee magaalada Helsinki, sooshalladda ama shaqaalaha dugsiga.

# Aqoonta luqadeed ee dhinacyada badan waa muhiim

Aqoonta luqada waxbarashadu waa furaha waxbarashada ardayga. Horumarinyta aqoonta luqada finnisku waxay sii soconaysaa inta lagu jiro waxbarashada aasaasiga ah iyo kaddib. Gacan ku heynta iyo horumarinta joogtada ah ee luqada ardayguna waa muhiim, waxay aasaas u sameysaa waxbarasho kasta, xittaa barashada luqadaha cusub. Dugsiyada Reer Helsinki waxaa lagu qaataa waxbarasho luqadaha ah oo dhinacyo badan. Qaar kamid ah barashada luqaduhu waxay ka dhexeeyaan dadka oo dhan qaarna qasab ma aha. Waxaa kale oo Helsinki laga helaa waxbarashada aasaasiga ah oo luqada iswiidhishka ku baxda.

### Luqada finnishku waxay ku horumartaa barashada

Taageero dhinacyo badan oo baahiyaha waafaqsan ayuu dugsiga ka bixiyaa waxbarashada ardayda luqadaha badan iyo barashada luqada finnishka. Maadada luqada hooyo iyo suugaantu waa labo cadad waxbarasho oo kala duwan, luqada finnishka iyo suugaanta iyo weliba finnishka oo sidi luqad labaad ah iyo suugaanta (S2). Caddada waxbarashooyinku waxay leeyihiin hiigsiyo yara kala duwan.  Ardayga luqadaha badan ku hadla wuxuu baran karaa finnishka oo sidi luqad labaad oo kale illaa iyo inta qaybaha luqadu u qaybsanto uusan si buuxda u aqoonin. Qaybaha aqoonta luqadu waa fahamka hadalka, hadalka, fahamka qoraalka iyo qoritaanka.

Waxbarashada ku baxda luqada iswiidhishka waxaa cadada waxbarashada ee swiidhishka iyo suugaantaba loogu baran karaa sidi luqad labaad oo kale(S2).

### Waxaa wanaagsan in luqado badnaanta lagu xoojiyo guriga iyo dugsiga


Helsinki waxaa laga bixiyaa waxbarashada afka hooyo oo luqado badan ah. Ka qaybqaadashada barashada afka hooyo ma aha qasab, laakiin iska diiwaangelinta kooxda kaddib waxaa ardayga laga doonayaa in uu si joogto ah uga qaybqaato. Aasaasidda kooxdu waxay ku saleysan tahay isdiiwaangelinta. Iska diiwaangelinta waxbarashada waxaa la sameeyaa islamarka dugsiga la iska diiwaangelinayo ama foom gaar ah ayaa la isaga diiwaangeliyaa. Macluumaadka ku saabsan iska diiwaangelinta waxbarashada afka hooyo, jadwalka iyo goobaha waxbarashada waxaa laga helaa dugsiga.

Aqoonta afka hooyo waxay aasaas u dhistaa barashada luqadaha kale iyo waxbarashada kale ee dugsiga. Sidaas darteed waxaa muhiim ah in lagu hadlo, maqlo islamarkaasna guriga loogu isticmaalo habab iyo in la akhriyo suugaanta iyo qoraallo kala duwan.

**Barashada luqaduhu waxay billaabataa fasalka 1aad**

Dugsiyada Helsinki waxaa lagu baran karaa luqado dhinacyo badan. Barashada luqada qalaad waxaa lagu wada billaabaa fasalka 1aad. Barashada luqada labaad ee dadka oo dhan waxay ka billaabanaysaa fasalka 6aad.

Waxaa intaas dheer in ardaydu ay heystaan fursad ay maaddo xulasho ahaan ah ugu baran karaan luqada A2 laga billaabo fasalka 3aad iyo luqada B2 laga billaabo fasalka 8aad. Haddii uu ardaygu doonayo wuxuu isugeyn baran karaa afar luqadeed oo ka baxsan afka finnishka iyo afkiisa hooyo. Luqada luqadda ee dugsiyuhu waa mid ay dugsiyadu ku kala duwan yihiin. Luqadaha la kala xusho ee dugsigu waa mid ay dugsiyadu ku kala duwan yihiin waxaana dhici karta in isbeddel ku yimaado luqadaha la kala xulanayo.




A1 iyo A2= arday kasta wuxuu dooranayaa hal luqad.

Suurtagal ma ahan in dugsiyada oo dhan lagu barto luqadaha oo dhan. Luqadaha la kala xulanayo ee dugsiyada waxaa laga helaa bogga shabakadda dugsiga.

| A 1 | A 2 | B 1 | B 2 |
|---|---|---|---|
| ingiriis | ingiriis | ingiriis | isbaanish |
| isbaanish | isbaanish | iswiidhish | itaaliyaan |
| shiinees | shiinees | | shiinees |
| Afka saami ee | faransiis | | laatiin |
| Woqooyiga | iswiidhish | | faransiis |
| faransiis | jarmal | | jarmal |
| iswiidhish | ruush | | ruush |
| jarmal | | | |
| ruush | | | |
| istooniyaan | | | |

# Waxbarashada finnishka oo sidi luqad labaad ah

Inta badan waxaa ardayga lagula taliyaa caddada waxbarashada finnishka oo luqad labaad ah iyo suugaanta (S2), haddii ardayga afkiisa hooyo uu yahay luqad aan finnish ahayn ama uu sidiisa kale asal ahaan luqado badan leeyahay. Si loo xoojiyo soojeedinta waxaa markasta si dhinacyo badan looga baaraandegayaa aqoonta luqadeed ee ardayga. Waxbarashada S2 waxay ka dhici kartaa koox gaar ah oo S2 ama kooxda luqada finnishka iyo suugaanta.

Caddada waxbarasho ee hiigsiyada ku jira waa kuwa wax badan isku jira, laakiin waxbara shada S2 waxaa si gaar fiiro loogu yeelanayaa luqada finnishka iyo in ay tahay agabka kale ee waxbarashada. Waxaa aasaas u ah baahiyaha waxbarasho ee ardayga iyo marxaladda barashada luqada. Doorashada caddada waxbarashada waalidka ayaa sameynayaa iyagoo ku saleyanaya soo jeedinta macallimiinta. Waxbarashada ku baxda luqada iswiidhishka waxaa cadada waxbarashada ee iswiidhishka iyo suugaantaba loogu bartaa sidi luqad labaad oo kale.

Aqoonta luqadu waa qaninimo. Cilmibaarista ayaa lagu caddeeyay in luqado badnaantu ay faa'iido u leedahay horumarka waxbarasho ee cunugga. Sidaas darteed ayaa waxaa muhiim ah, in ardayda afkooda hooyo uu yahay luqad kale oo aan finnish aheyn ay qaataan waxbarashada S2 ka sokow waxbarashada afkooda hooyo. Barashada afkaada hooyo waxay sidoo kale taageeraysaa barashada afka finnishka.

"Barashada S2 kama dhigna, in la hilmaamayo afka hooyo- waa la baranayaa. Marka ay ugu fiican tahay wuxuu ardaygu labada luqadood waa finnishka iyo afkiisa hooyee ka gaarayaa heer aqoon oo xooggan. Ardayda waxaan markasta ku dhiirigelinaa marka ay dugsiga joogaan barashada afkooda hooyo", sidaas waxaa sheegtay macallimadda finnishka oo sidi luqad labaad ah **Elli Saari** .

### Akhrintu waxay si xooggan u horumarisaa aqoonta luqada

Barashada luqada cusub waxay qaadataa sannado badan. Aqoonta luqadu waxay si xooggan ugu horumartaa akhrinta. Xiisadaha S2 waxaa lagu akhriyaa qoraallo kala duduwan waxaana carruurta lagu qalqaaliyaa suugaanta iyagoo baranaya buugaag kala duduwan. "Ardayda waxaan u qabtaa koox akhris. Ardayd badan waxay ka helaan wax akhrinta, marka ay ogaadaan, in akhrin karaan buug dhan", sidaas waxaa caddeysay Elli Saari.



Macaliimadda S2 Elli Saari waxay ka shaqeysaa dugsiga hoose ee Kontula.

“Ardaydu iyaga ayaa dooranaya buugga ay doonayaa in ay akhriyaan. Buugaagta la akhriyay imtixaan loogama qaado, laakiin ardaydu waxay ardayda kale ee isla buugaas akhrisay xiisadda dhexdeeda ugala sheekeysanayaan wixi ay akhriyeen. Tani waxay gacan ka geysataa fahamka qoraalka. Ardaydu waxay ka heleen koox akhriska waxayna u sugayaan si niyad ah.”

Luqada oo loo isticmaalo hab dhinacyo badan waxay caawisaa barashada aqoonta luqadeed oo wanaagsan. Daawashada iyo dhegeysiga filimada, riwaayadaha iyo barnaamishyada waxbarasho ee kala duduwan waxay horumariyaan aqoonta luqada. Ardaydu waxay sameyanayaa fiidiyowyo bandhigyo. Xiisadaha S2 qaarkood waxaa lagu isticmaalaa barashada maaddooyinka kale sida maaddooyinka akhriska ah, erey-bixinnada iyo luqada, taas oo taageereysa barashada.

## Ardaydu rabitaan ayeey ku imaanayaa xiisadaha S2

“Ardaydu rabitaan iyo farxad ayeey ku imaanayaa xiisadaha S2. Macallimadda waxaa abaalgud u ah in ay ardaygu ku aragto farxadda waxbarasho. Markaas waxaad dareemeysaa in aan macallimad ahaan guuleysatay.  Inkastoo aqoonta luqadeed ee ardaydu ay kala heer tahay, dhammaantood waxaa mideysa asalka luqad badnaanta ah iyo hiigsiga isku midka ah yacni barashada luqada. Marka ay koox ahaan wax u baranayaa waxay ardaydu inta badan gartaan in ay is caawiyaan. Asxaabtu waxay xittaa iska caawiyaan barashada luqada.”



# Waxbarashadu waxay ku saleysantahay qorshaha waxbarashada

Inta lagu jiro dugsi-sannadeedyada ugu horreeya wuxuu ardaygu baranaa macluumaadyada iyo aqoonta aasaasiga ah ee muhiimka ah iyo ku dadaalista arrimaha dhigashada dugsiga la xiriira. Wuxuu baranayaa in uu koox la shaqeeyo saaxbiibana wuu helayaa. Marka ay dugsi-sannadeedyadu sii socdaan waxaa sii kordhaya waajibka shaqada dugsiga, barashada madaxbanaanida leh ayaa kordheysa aqoonta fikirika ee waxbarashada u muhiimka ahna waa horumaryaan. Macallimiintu waxay ardayda ka taageerayaan noqoshada qof si firfircoonaan leh wax u qabta.

Fasallada 1-6 wuxuu ardaygu leeyahay macaliin fasal, kaas oo maadooyin badan oo kala duduwan bara. Macallinka fasalku waa dhisaha bulshada fasalkiisa iyo xiiso-geliyaha waxbarashada. Ardaygu wuxuu sidoo kale leeyahay macallimiin kale.

Fasal-sannadeedyada 7—9 marka uu u ku jiro wuxuu ardaygu leeyahay macallimiin badan, sababtoo ah maaddo kasta waxay leedahay macallin u gaar ah. Hagaha fasalku waa macallin, kaas oo la socda arrimaha la xiriira dugsi dhigashada ardaydiisa mas'uuliyiintana cunugga la xiriira. Hagaha fasalku wuxuu ardayda kula kulmaa fasalkiisa marka la qaadanayo xiisadaha horjoogaha fasalka. Wuxuu sidoo kale inta badan ardayda fasalkiisa u dhigaa maaddo uun.

## Qorshaha waxbarashada ayaa haga shaqada dugsiga

Dugsiyada Helsinki waxay leeyihiin qorshe waxbarasho oo mideysan, kaas oo ku saleysan qorshaha waxbarashada dalka oo dhan. Qorshahan waxbarashada waxaa lagu sheegayaa arrimaha aasaasiga ah ee ku saabsan waxbarashada dugsiga sida hiigsiyada waxbarashada, qiimaha, hababka shaqada. Waxaa kale oo intaas dheer in dugsiga kasta uu leeyahay qorshihiisa waxbarasho, kaas oo si faahfaahsan loogu sheegaya, sida dugsiga wax looga qabanayo iyo sida loo baranayo. Qorshaha waxbarashada mideysan ee Helsinki iyo qorshaha faahfaahsan ee dugsi kasta u gaarka ah waxaa laga ogaan karaa bogagga ops.edu.hel.fi

Dugsiga waxaa lagu bartaa in wax loo qabto hab nidaamsan oo dhabar-adayg leh. Waxaa halkaas lagu bartaa aqoonta muhiimka u ah nolosha iyo nololmaalmeedka. Barashada aqoonta ismuujinta oraaheed iyo isdhexgalka horumarka leh waxaa loo arkaa in arrin muhiim ah. Teknolojiyada macluumaadka iyo isgaarsiinta waxaa looga faa'iidaysanayaa waxbarashooyinka oo dhan. Waxbarashadu waxay ku fidaysaa agagaarka dugsiga iyo magaalada oo dhan.

Arday kasta wuxuu inta lagu jiro sannad-dusgiyeedka baranayaa ugu yaraan labo maaddo oo dhammaystiran islamarkaasna dhaafsiisan xadka, wakhti dheer soconaya ifafaalana ku saleysan. Ifafaalo ku saleysanaanta waxaa loola jeedaa waxbarasho, taas oo lagu hubinayo ifafaalooyinka dunida ee dhabta ah iyadoo xadadka maadooyinka la dhaafayo. Ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay waxyabahan ka sheekeystaan, su'aalo iska weydiiyaan islamarkaasna ay su'aal saaraan.

## Qiimeynta barashada iyo aqoonta ee ardayga

Qiimeynta waxbarashadu waxay ku saleysan tahay hiigsiyo maaddo kasta loo dejiyay oo qorshaha waxabarsahada ku saleysan iyo sawirka aqoonta wanaagsan ee ardayga. Qiimeynta ugu dambeysa waxaa loo isticmaalayaa shuruudaha qiimeynta ugu dambeysa ee dalka oo dhan u degsan. Ardaygu wuxuu dhammaadka sannad-dugsiyeed kasta helayaa shahaadada sannad-dugsiyeedka. Waxay hadal ahaan ama nambar ahaan u muujinaysaa, sida uu ardaygu u gaaray hiigsiyada maaddo kasta loo dejiyay.

# Qiimeynta barashada iyo aqoonta ee ardayga

Qiimeynta waxbarashadu waxay ku saleysan tahay hiigsiyo la dejiyay oo qorshaha waxabarsahada ku saleysan iyo sawirka aqoonta wanaagsan ee ardayga. Waxbarashada, shaqada iyo habdhaqanka ardayga waxaa laga qiimeynayaa dhinacyo badan inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka iyo marka uu dhammaado. Qaybta ugu muhiim qiimeyntu waa aragti-celinta uu ardaygu sida joogtada uga helo waxbarashadiisa inta lagu jiro maalmaha dugsiga.

Hawsha qiimeyntu waa
- hagidda iyo taageeridda marxaladaha waxbarashada
- xoojinta kalsoonida uu ardaygu ku qabo awooddiisa
- horumarinta awoodda ardaygu u leeyahay isqiimeynta.

**Qiimeynta wakhtiga sannad-dugsiyeedka**

Inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka wuxuu ardaygu helayaa aragti-celinta qiimeynta oo qayb ka ah waxbarashada iyo waxqabadka. Isagoo kaalmaysana aragti-celinta ayuu ardaygu fahmayaa, waxyaabaha ay yihiin hiigsiyada waxbarashadu. Hawsha qiimeynta waa ka caawinta ardayga in uu garto, sida uu isagu saameynta ugu yeelan karo waxbarashadiisa iyo horumarkiisa.

Waxyaabaha la baranayo waxaa loo keydiyaa qabaab kala duwan. Sidan ayeey ardayga iyo macallinkuba ku arkayaan marxaladaha ka duwan ee waxbarashada, maxaa gacan ka geysanaya in la arko, sidee ayeey waxbarashada oo hiigsiyada waafaqsan horay ugu socon kartaa. Noocyada keydintu waa tusaale ahaan, xusuusqoryada waxbarashada, sawiro, fiidiyow, sawir gacmeedyo, naqshado iyo farshaxannada sawir gacmeedka. Waxsoosaaryadan, isqiimeynta iyo aragti-celinta macallinka ayaa la isugu geynayaa fayl, kaas oo loo kaalmeysanayo qiimeynta.

## Qiimeynta dhammaadka sannad-dugsiyeedka

Marka uu sannad-dugsiyeedku dhammaado wuxuu ardaygu helayaa shahaadada sannad-dugsiyeedka. Waxay hadal ahaan ama nambar ahaan u muujinaysaa, sida uu ardaygu u gaaray hiigsiyada maaddo kasta loo dejiyay inti lagu jiray sannad-dugsiyeedka. Isbarbardhig ardayda laguma sameeyo.

- Shahaadooyinka fasallada 1-2 waxaa loo isticmaalaa qiimeyn hadal ah. qiimeyntaasna waxay si gaar ah ugu jihaysan tahay horumarka ardayga iyo aqoontiisa guud ee waxbarashadaiyo waxqabadka
- Qiimeynta fasallkada 3–7 waa qiimeyn hadal ama nambar ah ama waa labadaas oo la isku daray.
- Shahaadooyinka fasallada 8–9 waxaa markasta loo isticmaalaa qiimeyn nambar ah.

Isbeddel dalka oo dhan ah ayaa qiimeynta ku soo socda, kaasoo uu Golaha waxbarashadu gu'ga 2020 go'aan ka gaarayo. Isbeddelku wuxuu saameyn ku yeelan karaa hababka qiimeynta hadalka iyo nambarka ah.

## Qiimeynta ugu dambeysa

Marka uu dugsiga hoose-dhexe dhammaado qiimeynta ugu dambeysa ayaa ardayga la siinayaa. Qiimeynta ugu dambeysa waxaa laga sameynayaa hiigsiyada maaddooyinka laga gaaray oo ku saleysan aqoonta la soo bandhigay inta lagu jiray fasallada 7-9. Qiimeynta waxaa loo isticmaalayaa shuruudaha qiimeynta ugu dambeysa ee dalka oo dhan u degsan

## Isdhexgalka

Qiimeynta wanaagsan waa isdhexgalka u dhexeeya macallimiinta iyo ardayda ee dareenka wanaagsan leh. Inta lagu jiro sannad-dugsiyeedka ayaa waxaa waxbarashadaka lagala hadlayaa ardayga, macallinka iyo waalidiinta. Kalsoonida mas'uuliyiinta ee awoodda ardayga waxay saameyn wanaagsan ku leedahay sawirka wax barte ah ee uu ardaygu naftiisa ka heysto.




**Maaddooyinka lagu barto fasallada 1-6 waa**

- afka hooyo suugaanta
- luqada labaad ee dalka yacni iswiidhish ama finnish
- luqado qalaad
- xisaab
- cilmiga deegaanka
- diinta
- cilmiga aragtida macnaha nolosha
- taariikhda
- cilmiga bulshada muusiikada farshaxan sawireedka hawlgacmeedka
- jimicisga

**Waxbarashada dabaashu waa qayb jimicsiga ka mid ah**

Ardayda fasallada 1-5 waxay ka qaybqaataan waxbarashada dabaasha. Aqoonta dabaasho waa qayb kamid ah waxbarashada jimicsiga ee dugsiga. Macallinku wuxuu aqoonta dabaasha u qiimeynayaa iyadoo qayb ahaan kamid ah jimicsiga. Ardaydu waxay dabaashaan 4 jeer sannadkiiba. Hiigsigu waa, in ardaydu ay dabaalan yaqaanaan marka uu dhammaado dugsiga.

# Jadwalka xiisadaha ayaa haga maalinta dugsiga

Ardaydu waxay dugsiga wax uga bartaan qaab waafaqsan jadwalka xiisadaha. Jadwalka xiisadaha waxaa lagu arkayaa maaddooyin maalmaha todobaadka la baranayo iyo wakhtiyada maalin dugsiyeedku billaabanayso islamarkaasna dhammaanayso.





# Khulood waxay ku jirtaa fasalka 4aad ee dugsiga hoose-dhexe

Khulood waa arday 11 sano jir ah oo dhigta dugsiga hoose ee Lauttasaari. Labo sano ayeey Finland deganeyd. Waxay soo dhigatay fasalka diyaarinta ah kahor inti aanay imaanin dugsiga hoose ee Lauttasaari. Khulood afkeeda hooyo waa carabi. Qoyskeedu wuxuu ka kooban yahay waalidkeed iyo saddex walaaladeed ah oo iyada kayar.

“Waxaan degganahay meel dugsiga u dhow socod ayaana dugsiga ku imaadaa. Inta badan waxaan dugsiga la imaadaa walaalshey, Walaashey waxay ku jirtaa fasalka 3A ee dugsigan. Anigu waxaan ku jiraa fasalka 4D-“ Khulood wuxuu sheegay in uu ka qaybqaato waxbarashada finnishka oo sidi luqada labaad ah. Xiisadaha afka hooyo waxaa todobaadkiiba halmar lagu qaataa Ruoholahti, halkaas oo uu Khulood aado jimco kasta xiisadaha kale kaddib.

“Waan ka helaa dugsiga. Waxaan halkaas ku sameystay boorsada qalimaanta oo geed ka sameysan”, Khulood ayaa sidaas sheegtay. “Kubbadda cagta ayaan dugsiga kaddib aabo iyo walaaladey la ciyaaraa.”

# Waxqabadka subaxdi iyo galabti ee dugsileyda

Carruurtu waxay ka qaybqaadan karaan waxqabadka subaxdi kahor inta aysan xiisaduhu billaaban iyo waxqabadka galabto marka ay xiisaduhu dhammaadaan. Qaar badan oo ku jira fasallada 1-2 waxay dugsiga yimaadaan kahor inta aysan billaaban maalin dugsiyeedka rasmiga ah ama waxay maalin dugsiyeedka kaddib sii joogaan dugsiga si ay ugu dheelaan, hiwaayad u sameeyaan ama ay laylisyada ugu sameeyaan. Waxqabadka subaxdi iyo galabti ee dugsileydu wuxuu carruurta u fidiyaa waxqabadka nashaad iyo ammaan leh, kaas oo ka baxsan maalin dugsiyeedka.

Waxqabadka subaxdi iyo galabti ee dugsileyda waxaa loogu talagalay ardayda ku jirta fasallada 1aad iyo 2aad iyo ardayda fasallada kale ee taageerada gaarka ah u baahan.

**Waxqabadka subaxdii ee dugsiyada**

Waxqabadka subaxdi ee waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu qabanqaabiyaa dugsiyada hoose-dhexe ee magaalada ama jardiinooyinka ciyaarta ee dugsiyada u dhow. Waxqabadka subaxdi waa mid aan qasab aheyn oo lacag la'aan ah. Waxqabadka laguma bixiyo quraac, laakiin carruurta waxay ku cuni karaan cuntooyinkooda ay soo qaataan.



**Waxqabadka subaxdi waxaa la iska diwaaangeliyaan Wilmada iyadoo la soo marayo.**

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxqabadka subaxdi iyo galabti waxaa laga helaa bogagga shabakadda:
hel.fi/helsinki/fi/kasvatus-ja-koulutus/perusopetus/aamu-ja-iltapaivatoiminta

Go'aan gooni ah lagama gaaro waxqabadka subaxdi ee waxaan ku filan in la iska soo diiwaangeliyo oo kaliya. Qabanqaabada waxqabadka waxaa soo ogeysiinayaa dugsiga.

**Waxqabadka galabta ee dugsiga ka dambeeya**

Waxqabadka galabti ee waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu qabanqaabiyaa dugsiyada ama jardiinooyinka ciyaarta ee dugsiyada u dhow. Hagayaasha waxqabadka galabti ayaa ku dadaalaya galabti waxqabadka iyo ammaanka carruurta. Carruurtu waxay heystaan fursad ay ku dheelaan, laylisyada ku sameeyaan, ku jimicsadaan kuna ciyaaraan, dalxiis gaaban ku sameeyaan asxaabna ay kula kulmaan. Waxqabadka wadajirka ah waxaa lagu qabanqaabiyaa gudaha iyo bannaanka. Inta lagu jiro waxqabadka galabti waxaa cunugga la siinayaa cunto fudud.

Waxqabadka galabti waa lacag, laakiin waxaa lacagta laga codsado qafiifin iyadoo lagu saleynayo dakhliga waalidka.

Jardiinooyinka ciyaarta xittaa waa lagu qabanqaabiyaa waxqabadka galabti ee dugsileyda. Waxqabadku waa lacag la'aan. Waxaa la iska diiwaangeli karaa cuntada fudud ee lacagta ah ee jardiinada ciyaarta ama cunuggu wuxuu soo qaadan karaa cuntadiisa. Waxaa la heli karaa in bixinta lacagta cuntada fudud lagaa dhaafo.

Macluumaadka rasmiga ah ee ku saabsan waxqabadka subaxdi iyo galabti iyo waxqabadyada kale ee naadiga iyo hiwaayadda ee uu dugsigu qabanqaabiyo waxay ku jiraan bogagga dugsiga barta Dusigeenna.



# Waxbarashada fasallada 7-9

Waxbarashada fasallada ugu dambeeya waxbarashada aasaasiga ah waa wakhti koritaanka oo da'yarka muhiim u ah. U wareegista waxbarashada maaddooyinku waxay ka dhigan tahay kooxo cusub, saaxiibo cusub iyo macallimiin cusub. Da'yarku wuxuu u baahan yahay dhiirgelin, taageero iyo hagitaan, si caddada waxbarashada ee waxbarashada aasaasiga ah uu u dhammeeyo kaddibna uu u helo booska waxbarashada siisocota oo ku habboon. Da'yarku wuxuu weli u baahan yahay taageerada waalidka.

Ardayda badankood waxay Helsinki wax uga bartaa dugsiga hoose-dhexe ee mideysan. Marka uu fasalka 7aad u wareegayo wuxuu ardaygu waxbarashadiisa ka sii wataa isla dugsigiisi uu yaqaanay. Haddii dugsiga ardaygu uu ahaa fasallada 1-6 oo kaliya, wuxuu xaq u leeyahay in uu galo fasalka 7aad ee dugsiga u dhow.

### Macallimiinta maaddooyinka, hagaha fasalka iyo hagaha ardayga

Maaddo kasta waxay leedahay macallin laantaas ku takhasusay. Hagaha fasalku waa macallin, kaas oo la xiriira mas'uuliyiinta kooxda ardayda oo gooni ah. Hagaha ardaygu yacni opo wuxuu sheegaa, hagaa caawimaadna ka geystaa sameynta go'aannada quseeya waxbarashada siisocota.

### Wakhtiga shaqo ee todobaadka

Wakhtiga shaqada todobaadka ee fasallada 7-9 waa ugu yaraan todobaadki 30 xiisadood.

### Maaddooyinka cusub iyo waxbarashada qayb-qaybta ah

Fasallada 7aad—9aad waxaa lagu bartaa maaddooyin cusub:
- bayooloji
- juquraafi
- fiisikis
- kimistari
- dhaqaalaha guriga
- caafimaadka nolosha iyo
- hagitaanka ardayga





Waxaa sidoo kale waxbarashada ardayga ku jirta waxbarashooyin la xushay. Macluumaad dheeraad oo kuwaan ku saabsan dugsiga ayaa laga helayaa.

Dusgiyo badan waxbarashada u qeybiyaan qab shan todobaad soconaysa, markaasna jadwalka xiisadahuhu wuxuu isbeddelayaa shantii todobaadba mar. Maaddooyin kala gedisan ayaa xilliyada kala duwan lagu baran karaa.

# Mohammad iyo Ibrahim waxay dhigtaan fasalka 9aad ee dugsiga hoose-dhexe

Mohammad wuxuu Ciraaq uga soo guuray Finland labo sano kahor. Wuxuu soo dhigtay fasalka diyaarinta ah hadda wuxuu ku jira fasalka sagaalaad ee dugsiga hoose-dhexe ee Jakomäki. Waxaa fasalka la dhigta Ibrahim oo Siiriya uga soo guuray Finland, kaas oo isna soo dhigtay fasalka diyaarinta ah markaas kaddib galay fasalka 8aad ee Jakomäki.

”Waxaa 7 sannadood dugsi ka dhiganay Siiriya kahor inti aanan Finland u soo guurin. Waxaan jiraa 16 sano. Billowgi hore dugsigu aad ayuu u adkaa, maadaama aan luqada aqoonin. Hadda waa ka fudud yahay sidi hore.” Sidaas



Mohammad, Ibrahim iyo hagaha ku hadla luqada carabiga Kamal Khafif (dhexda ku jira).

waxaa yiri Mohammad. “Xisaabtu waa maaddada aan dugsiga ugu jeclahay. Waxaa kale oo aan ka helaa luqada iswiidhishka.”

“Aniguna waxaa jiraan 16 sano.Finland waxaan imid sannadki 2017 waxaanna marki hore deganaa Pieksämäki. Waxaan galay fasalka diyaarinta ah ee Myllypuro haddana Mohammad ayaan la fasal ahay”, sidaas waxaa sheegay Ibrahim.

Wiilashu waxay sheegeen in dhaqanka dugsiyeedku Finland uu aad uga duwan yahay marka la barbardhigo kan dalkooda. Awoodda macallinka ee wadankeenu waa buuxda: “Waxaa qasab aheyd in la sameeyo wixi uu macallinku yiraahdo. Edbintu waxay aheyd mid adag – hadalka macallinka su’aal lagama soo celin karin. Halkan, Finland ardaygu aragtidiisa wuu sheegi karaa waana laga dhegeysanayaa. Marka ay timaado xaalad ismaandhaaf waxaan dugsiga ku isticmaali karnaa dhexdhexaadinta dadka isku filka ah. Labada dhinacba xal ayeey xaaladda u helayaan.”

Wiilashu dugsiga ayeey isku barteen haddana aad ayeey saaxiibo u yihiin. Labadooduba waxay dugsigooda ku qaataan waxbarashada afkooda hooyo. Waxbarashada diintoodana waxaa lagu bixiyaa dugsiga hoose-dhexe ee Jakomäki.



# Hagaha waxabarashadu wuxuu ka caawinayaa qorsheynta sii wadashada waxbarashada

Da'yarku wuxuu helayaa waxyaabo badan oo kala dooran karo dugsiga hoose-dhexe kaddib. Waxaa wanaagsan in mas'uulka iyo ardayguba ay raadsadaan macluumaadyada ku saabsan laamaha waxbarasho ee ay xiisanayaan inta lagu jiro fasallada ugu dambeeya dugsiga hoose-dhexe. Ardaygu wuxuu qoyskiisa iyo dadka u dhow uga baahan yahay caawimaad iyo dhiirigelin.

Shaqada hagaha waxbarashadu waa ka caawinta ardayga sidii uu u arki lahaa awooddiisa iyo wadada uu horay ugu soconayo. "Waxaan mar walba ka duulayanaa baahida ardayga. Qaarkood waxay horayba u sii heystaan rajooyin cadcad. Qaar badan waxa ka fekeraan waxyaabo kala duduwan" sidaas waxaa sheegtay **Anna-Leena Tallskog** oo dugsiga hoose-dhexe ee Käpylä ka ah hagaha waxbarashada. "Waxbarasho-xirfadeedku waa mid kamid waxyaabaha la kala doorto. Dugsigu wuxuu bixiyaa jidka fiican ee nolosha shaqada."

"Waxaan wanaagsan in hagahaada waxbarashada aad kala hadasho arrimaha ku saabsan waxbarashada sii wadashada ah. Hagaha waxbarashadu wuxuu aqoon u leeyahay in uu ka caawiyo su'aalaha iyo xal u helidda dhibaatooyinka. Hagaha waxbarashadu wuxuu dhallinyarada ka caawiyaa helitaan wadadiisa waxbarashada" sidaas waxaa sheegtay hagaha waxbarashada **Anne-Mari Kortelainen** ee Dugsiga hoose-dhexe.

**Dugsiyadu waxay qabanqaabiyaan munaasabado warbixineed iyo fiidadka kulanka waalidiinta oo ku saabsan xulashada wadajirka ah ee waxbarashada heerka labaad.**

Waxaa kale oo bogga Opintopolku.fi laga helaa macluumaad ku saabsan waxyaabaha la kala dooran karo.



Hagayaasha waxbarashada
Anne-Mari Kortelainen iyo
Anna-Leena Tallskog




# Diinta iyo cilmiga aragtida macnaha nolosha

Dugsiga waxaa lagu bartaa cilmiga aragtida macnaha nolosha. Maaddooyinka aragtidu waa maaddooyinka diinta iyo cilmiga aragtida macnaha nolosha. Maaddooyika waxaa loo baraa si waafaqsan qorshaha waxbarashada ee wadanka oo dhan. Waxbarashada maaddooyinka aragtidu waa mid ka madaxbanaan siyaasadda diinna aan ku saleysneyn. Maaddooyinka oo sii faahfaahsan waxaa looga bogan karaa qorshaha waxbarashada ee Helsinki. ops.edu.hel.fi/ops/#oppiaineet

**Hiigsiyada waxbarashada diinta**

Shaqada waxbarashada diintu waa siinta ardayga aqoon guud islamarkaasna ballaaran oo ku sabasan diinta iyo aragtida. Waxbarashada lagu fahmayaa diintaada waxaana sidoo kale lagu baranayaa diimaha kala duwan ee adduunka iyo aragtiyada. Waxbarashadu waxay bixinaysaa aqoon dhinacyo badan oo ku saabsan dimaha waxayna sidoo kale kaa caawinaysaa fahamka doodaha iyaga laga yeesho. Ardayda waxaa lagu hagayaan in ay diimaha iyo aragtida ka dersaan aragtiyo kala duduwan.

Waxbarashada ma ahan cibaado. Si kastaba ha ahaatee fahamka diinta waxaa qayb ka ah barashada noocyada cibaadooyinka iyo caadooyinka. Tusaale ahaan waxbarashada waxaa ku jiri kara booqasho waxbarasho, taas oo lagu tegayo dhisme diimeed ama waxaa lala soconayaa iyadoo aan laga qaybgaleyn hawl diimeed.



Qoysaska ayaa mas’uul ka ah barbaarinta diinta wadata ama diin la’aanta ah. Hawsha waxbarashada diinta ee dugsigu waa aqoon guud.

Waxbarashada diinta ee dugsigu waa maaddo. Ma ahan cibaado.

**Hiigsiyada cilmiga aragtida macnaha nolosha**

Hawsha waxbarashada cilmiga aragtida macnaha noloshu waa horumarinta diyaarsanaanta ardaydu ay ku noqonayaa kuwo madaxbanaan, dulqaad leh, mas’uul ah iyo noqoshada kuwa leh awoodda ay wax ku dhaliilaan iyagoo bulshada xubin ka ah. Hawsha bud-dhigga u ah waxbarashadu waa horumarinta awoodda ardayda ee raadinta nolol fiican. Sidan waxaa lagu gaarayaan waxbarasho wada awoodda aragtida iyo waxqabadka oo dhaliilo la socdaan. Hiigsigu waa helitaanka jinsiyad buuxda oo dimuquraadi ah oo ku nool dunida isku xirmaysa degdegna isu beddelaysa.

**Waxbarashada maaddooyinka aragtida ee dugsiga**

Ardayga waxaa si waafaqsan sharciga waxbarashada aasaasiga ah loogu hagayaa waxbarashada diintiisa ama cilmiga aragtida macnaha nolosha. Maaddada aragtidu waxay dugsiga ka tahay xulasho joogto ah.

- Dadka ka tirsan jimciyadda Injiilka Luteran waxay ka qaybqaadanayaan markasta waxbarasho jimciyaddan waafaqsan
- Dadka ka tirsan jimciyadda Ortodoksigu waxay baranayaan waxbarashada Ortodoskiga ama waxbarashada loo badan yahay
- Waxaa kale oo dadka ka tirsan jimciyado diimeedyada kale Helsinki lagu siiyaa waxbarashada diimahooda. Mas’uulka ayaa waxbarashadan ku codsanaya foomka loogu talagalay (Linkiga: Ka qaybqaadashada waxbarashada diintaada: hel.fi/static/liitteet-2019/KasKo/lomakkeet/oman-uskonnon-opetus.pdf. Macluumaad rasmi ah oo ku saabsan diimaha la barto waxaa laga helayaa dugsiga.
- Dadka aan ka tirsaneyn jimciyadaha diimuhu waxay baranayaan cilmiga aragtida macnaha nolosha.




# Daryeelka ardaydu waa taageerada nololwanaagga iyo caafimaadka ardayda

Daryeelka ardaydu waxay horumarisaa koritaanka iyo horumarka ardayda waxayna hibooyin u abuurta waxbarashada wanaagsan. Hiigsigu waa, in ardaygu uu dugsiga u dareemo meel ammaan iyo istareex ah uuna ka heli karo hagitaanka iyo taageerada uu u baahan yahay marka uu ku jiro xaalado dhibaato leh. Tan waxaa dheer in ardaygu uu xaq sharci ku saleysan u leeyahay daryeelka ardayga oo shakhsi ah.

Dugsiyada reer Helsinki waxaa dhammaantood laga helaa adeegyada daryeelka caafimaadka dugsiga, sooshalladda iyo cilmi-nafsiyaqaanka dugsiga. Dugsiga waxaa ka shaqeeya kooxda daryeelka ardayda oo dadka caam ah. Kooxda waa ka mid ahaan kara maamulaha dugsiga, kalkaalisada caafimaadka dugsiga iyo dhakhtarka, sooshallada dugsiga, cilmi-nafsiyaqaanka dugsiga, macallimadda gaarka ah, hagaha waxbarashada iyo haddii macalinka fasalka ama ama

horjoogaha fasalka. Kooxda waxay ka shaqeysaa horumarinta nololwanaagsga bulshada dugsig waxayna xal iyo taageero lagu caawinayo u raadisaa ardayda u baahan. Arrimaha ardayda waxaa iyadoo lagala shaqeynayo ardayga iyo qoyska loo maareeyaa si kalsooni leh. Haddii loo baahdo waxaa qoyska loo lagu hagayaa waxqabadka taageerada ee dugsiga ka baxsan.

### Daryeelka caafimaadka dugsiga

Daryeelka caafimaadka dugsiga waxaa ka shaqeeyaa kalkaaliyayaal caafimaad iyo dhakhaatiir. Kalkaaliyayaasha caafimaadka dugsigu waxay sannad kasta sameeyaan baaritaanka caafimaadka ardayda. Fasallada koowaad, shanaad iyo sideedaad ayaa lagu sameeyaa baaritaan caafimaad oo ballaaran, kaas oo lagu qiimeynayo caafimaadqabka qoyska oo dhan. Baaritaanka caafimaadka waxaa lagu dadaalayaa in lagu dadaalayaa in lagu ogaado carruurta iyo dhallinyarada taageerada u baahan. Wadashaqeyn ayaa qoysaska lagala yeelanayaa si loogu qabanqaabiyo taageerada ay u baahan yihiin.

### Sooshalladda dugsiga

Sooshalladda dugsigu waxay ardayga iyo dadka u dhow siisaa taageero, hagitaan iyo caawimaad xeeldheere. Sooshalladda dugsigu waa xeeldheeraha shaqada sooshalka. Caawimaad ayaa laga helaa, marka uu cunugga ama da’yarku qabo dhibaatooyin dugsi dhigashada ah, xiriirka saaxiibada ama noloshiisa ay ku dhaceen isbeddelo saameyn ku leh dugsi dhigashadiisa.

Shaqada sooshalladda dugsiga waxaa ku jira waxyaabaha ay kamid yihiin ogaanshaha dhibaatooyinka la xiriira habdhaqanka, xiriirka bulshada, qoyska ama dareenka nolosha iyo weliba qabanqaabinta taageerada iyadoo la shaqeynaysa ardayda, mas’uuliyiinta iyo shaqaalaha dugsiga.

### Cilmu-nafsiyaqaan

Cilmi-nafsiyaqaanka dugsigu wuxuu ardayga ka caawiyaa dhibaatooyinka waxbarashada, feejignaanta iyo dareenka nolosha iyo weliba xaaladaha cakiran. Cilmiu-nafsiyaqaanku wuxuu bixiyaa hagitaan, talosiin haddii loo baahdana wuxuu sameynayaa baaritaanno cilmi-nafsi ah.

Arrimaha ardayga waxaa si kalsooni leh iyo qaabka loogu heshiiyo loola maareynayaa ardayga iyo waalidiintiisa.

Haddii ay doonayaan waxay waalidiintu toos ula xiriiri karaan shaqaalaha daryeelka ardayda. Macluumaadkooda xiriirka waxaa laga helaa bogagga shabakadda dugsiyada.




# Taageerada waxbarashada iyo dhigashada dugsiga

Waxaa laga yaabaa in cunuggu uu dugsiga ugu baahdo taageero, si uu aqoontiisa iyo xirfaddiisa ugu horumariyo si fiican. Si loo taageero waxbarashada iyo koritaanka cunuggu doorka guriga iyo la shaqeynta dugsigu waa muhiim. Waxaa suurtagal in dugsiga taageero noocyo badan looga helo waxbarashada iyo dhigashada dugsiga.

Waxqabadyada taageerada ah waxay tusaale ahaan noqon karaan
- shaqooyin dhinacyo badan oo isbebeddela
- wax ku barashada koox waxbarasho oo aan xaddidnayn
- taageero waxbarasho
- waxbarasho gaar ah oo saacado yar ah
- adeegyada daryeelka ardayda


Waalidiintu horay ayeey macallinka kala soo xiriiri karaan, marka ay ka welwelaan waxbarashada. Horumarka waxbarashada ardayda waxaa lala socdaa iyadoo wadajir waalidka loola shaqeynayo. Cunuggu wuxuu xaq u leeyahay in uu helo taageerada la xoojiyay, haddii uu taageero joogto ah iyo waxqabadyo taageero oo nuucyo badan uu ugu baahan yahay waxbarashada iyo dugsi dhigashadaba. Taageerada la xoojiyay waxaa lagu siinayaa fasalkiisa iyadoo qayb ahaan waxbarashada kamid ah. Waxbarashada iyo dugsiga dhigashada cunugga iyo weliba ku filnaanshaha waxqabadyada taageerada ah waxaa wadajir loola qiimeeyaa waalidka. Haddii uu cunuggu u baahan yahay taageero intaas ka badan, waxaa loo baahan karaa taageerada gaarka ah. Taageerada gaarka ah waxaa lagu hirgelin karaa dugsiga fasalka dugsiga u dhow, fasalka gaarka ah ama dugsiga gaarka ah.

# Waddooyinka waxbarashada ee Helsinki



Helsinki

www.hel.fi
#HelsinkiOppii




Waxbarashada daa'inka ah: machadyada dadka shaqeeya, achadyada aqoon kororsiga dadka waaweyn iwm.

# Waxyaabaha la kala dooran karo dugsiga hoose-dhexe kaddib

Qofka dhammeeyay dugsiga hoose-dhexe wuxuu codsan karaa waxbarashada xiradda ama dugsiga sare. Kuwa kale oo la dooran karana ayaa jira, tusaale ahaan waxbarashooyinka diyaarinta ah. Waxbarashooyinka la sameeyo dugsiga hoose-dhexe kaddib waxaa loogu yeeraa waxbarashada heerka labaad.

Waxbarashooyinka heerka labaad waxay gaarsiiyaan shahaadada dugsiga sare ama shahaahada xirfadda aasaasiga ah. Waxbarashooyinkan kaddib wuxuu ardaygu xaq u leeyahay in uu codsado waxbarashada aqoon kororsiga ah ee jaamacadda iyo dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha. Shahaahada xirfadda ee aasaasiga ah waxay toos u bixisaa aqoonta rasmiga ah ee xirfadda la bartay.

**Waxbarashada xirfadda**

Waxbarashada xirfadda waxaa lagu qabanqaabiyaa machadka xirfadda. Shahaadooyinka xirfaddu waa shahaadooyinka aasaasiga ah ee xirfadda, shahaadooyinka xirfadda iyo shahaadooyinka xirfadda ee khaaska ah. Shahaadada xirfadda ee aasaasiga ah waxaa lagu qaataa aqoonta aasaasiga ah ee ay xirfaddu u baahan tahay. Shahaadooyinka xirfadda iyo xirfadda khaaska ah waxaa si qotodheer loogu bartaa aqoonta xirfadeed inta lagu jiro marxaladaha shaqada. Waxbarashada xirfadda waxaa wax looga bartaa si waafaqsan qorshaha horumarinta aqoonta shakhsiga ah (QHASH). Waxbarashada qaarkeed waxaa lagu qaataa nolosha shaqada. Dhammeynta shahaadada aasaasiga ah ee xirfadda kaddib waxaa toos loogu wareegi karaa nolosha shaqada ama waxaa waxbarashada laga sii wadan karaa dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha ama jaamacadda.

Sannadka oo dhan ayaa la codsan karaa waxbarashada xirfadda. Codsiga wadajirka ah waxaa ku codsada dadka dhammeeyay dugsiga hoose-dhexe, ardayda dugsiyada sare iyo kuwa kale ee aan heysan shahaadada heerka labaad. Inta kale oo dhan waxay ku codsadanaay codsiga joogtada ah.



Macluumaadka ku saabsan waxbarashada iyo codsashada waxaad weydiin kartaa hagaha waxbarashada. Waxaa kale oo macluumaadka laga helaa adeegga Opintopolku.fi iyo machadka waxbarashada iyo shahaadada qabanqaabiya.

### Waxbarashada dugsiga sare

Dugsiyada sare waxaa intooda badan lagu bartaa maddooyin lamid ah kuwa waxbarashada aasaasiga ah. Ardaygu wuxuu wax ku baranayaa qorshe waxbarasho oo shakhsi ah. Dhammaadka waxbarashada dugsiga sare waxaa la sameeyaa imtixaanka shahaadada dugsiga sare. Waxbarashada waxa laga sii wadan karaa dugsiga tacliinta sare ee xirfadaha iyo jaamacadda.

U qaadashada ardayda dugsiga waxay ku saleysan tahay celceliska dhibcaha maaddooyinka akhriska ee shahaadada dugsiga hoose-dhexe.

Dugsiyada sare waxaa lagu codsadaa codsiga wadajirka ah ee adeegga Opintopolku.fi.

### Isku darka waxbarashada dugsiga sare iyo xirfadda yacni laba shahaado

Midka mid ah hababka lagu baran karo waxbarashada dugsiga sare iyo xirfaddu waa labada shahaado, markaas waxaa la sameynayaa shahaadada xirfadda, waxbarashada dugsiga sare iyo shahaadada dugsiga sare.  Machadka uu ardayga sameynaya labada shahaado ka tirsan yahay waa inta badan machadka xirfadda, halkaas oo uu wakhtigiisa inta badan ku baranayo waxbarashada ay shahaadada xirfadda aasaasiga ah u baahan tahay.

### Waxbarashada diyaarinta ah waxay caawisaa horay u socoshada

Haddii diyaar ahaanshaha da'yarka dhammaynaya waxbarashada aasaasiga ah aysan weli ku filneyn u wareegista waxbarashada heerka labaad, wuxuu codsan karaa waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada dugsiga sare ama waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada xirfadda.

### Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada dugsiga sare, LUVA

Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada dugsiga sare wuxuu ardaygu ka helayaa diyaargarowyo uu dugsiga sare ku codso. Waxbarashada waxaa loogu talagalay dadka dalka u soo guuray iyo ardayda luqada qalaad ku hadla, kuwaas oo hiigsigooda mustaqbalku yahay dhammeynta dugsiga sare iyo imtixaanka shahaadada dugsiga sare, balse aqoonta luqadeed ee looga baahan yahay waxbarashada dugsiga sare ay qabyo ka tahay.


Waxbarashadu waxay ka kooban tahay barashada luqadaha finnishka iyo ingiriiska, aqoonta bulshada iyo dhaqanka, xisaabta iyo culuunta dabiiciga ah ee loogu baahan yahay waxbarashada dugsiga sare iyo xoojinta diyaar ahaanshaha.

### Waxbarashada diyaarinta ah ee waxbarashada xirfadda, VALMA

Waxbarashada diyaarinta waxaa laga helayaa diyaargarowyo lagu codsado waxbarashada xirfadda. Valma waxaa loogu talagalay dadka dhammeeyay dugsiga hoose-dhexe balse aan weli aqoonin wax uu doonayo in uu barto islamarkaasna doonaya in uu wanaajiyo aqoontiisa waxbarasho kahor inta uusan u wareegin waxbarashada heerka labaad.

Valma waxay doorasho sax u tahay xittaa dadka waaweyn, kuwaas oo doonaya in ay wanaajiyaan diyaar ahaanshahood ay wax uga baranayaan waxbarashada heerka labaad. Tusaale ahaan Valma waxay ku habboontahay dadka dalka u soo guuray iyo dadka qorsheynaya in ay laantooda xirfadeed beddelaan.

Valma waxaa wax looga bartaa hab waafaqsan qorshaha waxbarashada shakhsiga ah Valma waxaa la codsadaa iyadoo la soo marayo wadada waxbarashada.



**Macluumaadka waxbarashada iyo codsashada waxaa laga helayaa adeegga Opintopolku.fi.**

Fursadaha sii wadashada waxbarashada waxaa lagala baaraandegayaa hagayaasha waxbarashada iyo macallimiinta marka lagu joro fasallada 7aad iyo 9aad.



# Macluumaadyo dheeraad ah iyo linkiyo ku saabsan waxbaridda iyo waxbarashada

**Talobixinta barbaarinta iyo waxbarashada**
Telefoonka 09 310 44986 maalmaha shaqada saacadda 10–12 iyo 13–15.
Cinwaanka booqashada: Töysänkatu 2D, 00510 Helsinki
Cinwaanka boostada: SB 51300, 00099 Magaalada Helsinki Telefoonka dhexe: 09 310 8600 maalmaha shaqada saacadda 8 – 16.

edu.hel.fi
Macluumaadka waxbaridda iyo waxbarashada ee Helsinki

hel.fi/palvelukartta>kasvatus ja koulutus
Dhammaan adeegyada la xiriira barbaarinta iyo waxbarashada waxay ku yaalaan kaartada Helsinki

hel.fi/peruskoulut/fi
Dugsiyada hoose-dhexe ee Helsinki oo alifbeeto ahaan isugu xigxiga

**Bogagga hore ee dugsiga iyo bogagga facebooga**
Bogagga waxaa laga helaaa waxyaabaha ay ka midka yihiin qorshaha waxbarashada dugsiga, luqadaha uu bixiyo, wakhtiyada shaqada iyo fasaxa, war-saxaafadeeydada, macluumaadka waxqabadka subaxdi iyo galabti iyo waxyaabo kale oo badan.

OPS.edu.hel.fi
Qorshaha waxbarashada Helsinki

opintopolku.fi
Macluumaad ku saabsan machadyada waxbarashada Finlnad
iyo dugsiyada tacliinta sare

**Soosaaraha:** Waaxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada ee magaalada Helsinki
**Sawirada:** Jefunne Gimpel
Macluumaadka hagahan waxaa la hubiyay Disembar 2019.
Waxaan reebanaynaa xuquuqda wax ka beddelista
**Macluumaadyada wakhtiga la socda:**
hel.fi/maahanmuuttajat/fi/kasvatus-ja-koulutus/make/

Helsinki

www.hel.fi
#HelsinkiOppii

